Sveriges Kommuner och Regioner

Ma uur Baad leedahay mise dhawaan baad umushay? Codkaaga mid la maqlo ka dhig!

Ka qayb qaado (Graviditetsenkäten) Foomka ra'yi urrurinta dumarka uurka leh

Haddii aad uur leedahay ama aad dhawaan umushay ayaad haysataa fursada aad kaga qaybqaadanayso Graviditetsenkäten oo aad kaga jawaabayso su'aalaha ku saabsan sida aad u aragtay daryeelka iyo caafimaadkaaga inta aad uurka laheyd iyo dhalmada kadib. Uur iyo dhalmada kasta waa mid gaar ah, sidaas darteed ayay muhiim ugu tahay inaad adigu ka qaybqaadato. Waxa ay jawaabahaagu gacan ka geysanayaan in daryeelka caafimaadka la sii horumariyo.

Sveriges Kommuner och Regioner

Waxa foomka ra'yi ururintaada laga helayaa 1177.se

Waxa ra'yi ururintu ku jirtaa sanduuqaaga bogga 1177.se. Soo gal oo buuxi macluumaadkaaga xiriirka si laguugu xusuusiyo marka ay wakhtigii aad ka qaybqaadanaysan gaadhay. Waxay ra'yi ururinta qiyaas ahaan qaadanaysaa ilaa shan daqiiqo in laga jawaabo waxaana lagu turjumay todoba luqadood oo kala duwan.

Waxa la soo dirayaa saddex jeer oo kala duwan, waxaana ka jawaabi kara gabadha:

- ku jirta uurka toddobaadka 25aad
- ilmo dhashay siddeed todobaad kahor
- ilmo dhashay hal sano kahor

Sidan ayaad samaynaysaa si aad uga qaybqaadato

1. Soo gal bogga 1177.se.
2. Tag goobaha “inställningar” oo ku buuxi iimaylka/ama lambarka gacanta.
3. Dooro inaad ku hesho ogeysiis emayl iyo/ama SMS ahaan.

Marka la gaaro wakhtigii aad foomka ra'yi ururinta buuxin laheyd waxaad heli doontaa fariin. Marka aad foomka ra’yi ururinta hesho waxaad haysataa lix toddobaad inaad kaga jawaabto.

Xogtaada ayaa la illaalinayaa

In laga qaybqaato ra'yi ururinta ayaa xor loo yahay iyadoo jawaabuhu noqon doonin kuwo aan adiga shakhsi ahaan lagula xidhiidhsiin doonin. Waxa natiijada loo isticmaali doonaa si ay gundhig ugu noqoto sii hagaajinta waxqabadyada.

Miyaad leedahay wax dhibaato ah ama aad u baahan tahay taageero xilliga aad uurka leedahay ama dhalmada ka dib? La xidhiidh umulisadaada ama rugta caafimaadka.